

**WAR SAXAAFADEED****Shaqaaqada ka dhanka ah Hawlaha Gargaarka ee Jowhar Waxa ay Halis Gelineysaa Carruurta iyo Haweenka Soomaaliyeed**

NAYROOBI, 17 Juunyo 2009: UNICEF waxa ay aad uga xumaatey weerarka iyo shaqaaqooyinka cusub ee ka dhanka ah howlaha gargaarka bani'aadamnimada ee Soomaaliya kuwaas oo halis weyn gelinaya nololsha carruurta iyo haweenka Soomaaliyeed ugana sii daraya silica ba'an ee horeyba u sii dabadheeraa, isla markaana yaraynaya sidii ay ku heli lahaayeen adeegyada xasaasiga ah, ayey tiri Hannan Suleymaan, oo ah Ku-simaha Wakiilka UNICEF ee Soomaaliya.

La wareegiddii ay maaliishiyaad la wareegeen xarunta UNICEF markii magaalada Jowhar ee Bartamaha Soomaaliya ay qabsadeen xubno Al-Shabaab ka tirsani 17kii Maajo iyo bililiqadii iyo burburintii ka dambeysey ee loo geystey sahaydii iyo qalabka bani'aadamnimada ee logu talagalay in lagu badbaadiyo nafta dadka aadka u tabaalaysan ayaa si weyn u saameysey awoodda ay UNICEF u leedahay wax ka qabadka gargaarka adeegyada muhiimka ah ee ay siiso carruurta iyo haweenka aadka u liita. Ilaa waqtigan, xarunta UNICEF ayaa weli ay haystaan maliishiyaad iyada oo shaqaalihii UNICEF-na aaney gaari Karin xarunta.

“In kasta oo maamullada degaanno badan oo Soomaaliya ku yaalla iyo UNICEF ay leeyihiin xiriirro iskaashi, waxa aan Jowhar kala kulanney dhaqaaqo aan hore noo soo marin oo ka dhan ah howlaha bani'aadamnimada, waana xaalad welwelka ay UNICEF ku hayso mid ka weyn ku abuureysa bulshooyinka Soomaaliyeed.” Ayaa ay tiri Hannan Suleymaan. “Kuwa ku kacaya falalkaan aan la aqbali karin oo ay mas'uuliyad-xumada ka muuqato waa in ay fahmaan in falalka ay ku kacayaan cirib-xumo ba'an ku leeyihiin carruurtooda, haweenkooda, bulshadooda iyo dadka Soomaaliyeed oo dhan”.

Caqabaddan ba'an ee haysata shaqada UNICEF waxa ay kusoo beegantay xilli xasaasi ah oo dadka Soomaaliyeed ay baahi badan uqabaan gargaarka bani'aadamnimo. Ilaa iyo bilowgii bishii hore, 122,000 oo qof ayaa ku barokacay dagaalladii ba'naa ee ka dhacay Muqdisho, tiradaas oo ah tii ugu badneyn ee dad cusub oo ku barokacay muddo hal bil waxyar uun ka badan. Dadka barokacay ma haystaan xataa adeegyada aasaasiga ah ee ay ka mid yihiin hoy, cunto, biyo iyo ilaalin/badbaado. Xaaladda ba'an ee dadkaas ku habsatay waxaa sii murjiyey iyada oo hay'adihii bani'aadamnimada ay ka maqan yihiin goobta. In kasta oo ay UNICEF hawsheeda ka sii waddo Soomaaliya, haddana joogiddeeda gobollada Bartamaha iyo Koonfurta Soomaaliya waxaa wax u dhimey haysashada ay xarunteeda ay weli haystaan maliishiyaad, iyo sahaydeedii oo ku kala go'dey Jawhar.

“Shabakadda hay'adaha ee fuliya howlaha gargaarka UNICEF waxay ka kooban yihiin ilaa 100 hay'ado aan dowli ahayn iyo kuwo bulshada ah kuwaas oo aan dhisaynay muddo sanado ah si ay u fuliyaan howlaha gargaarka ee caafimaadka, nafaqeynta, biyaha iyo fayadhowrka, waxbarashada iyo howlaha taakulaynta iyo badbaadinta caruurta.” Ayey tiri Hannan Sulaymaan. “Haseyeeshee, shabakaddaas ayaa qarka u saaran in ay burburto sababtoo ah waxaan awood u yeelan weyney in aan wakhtigii loogu talagalay gaarsiino sahaydii gargaar ee ay howlfuliyeyaasheenu, oo intooda badani ay Soomaali yihiin, ku gargaari carruurta iyo haweenka ka faa'iideysta mashaariicda howlaha lagama maarmaanka nafbadaadinta.”

Iyada oo qalabkii qaboojiyaha (keydkii talaalka) tallaalka ee Jowhar - oo ahaa kii ugu weynaa Soonka Bartamaha-Koonfurta – aannu hadda shaqeynin, ayaa kumanaan xabbo oo tallaalka nafaha lagu badbaadinayey oo loogu talagalay carruurta iyo haweenka ay burbureen. Sahaydii nafaqada aadka u qiimaha badneyn ee loogu talagalay in loo qaybiyo 40,000 oo ka mid ah carruurta aadka u tabarta daran da'dooduna ka yar tahay saddex sano si looga hortago nafaqo-darrada ba'an ee haysata ayey biliqeysteen maliishiyaad. Jowhar waa xarunta ugu weyn ee UNICEF ay ka gargaarto ilaa 200 xarumo quudineed oo lagu daweyo carruurta ay hayso nafaqo-xumada aadka u ba'ani – taas oo ah xaalad nololsha halis gelisa- iyo 80 barnaamijyada quudinta dheeriga ah oo lagu daweyo carruurta ay hayso

nafaqo-xumada dhexdhexaadka ah. Daahidda sahayda nafaqada iyo tan daawadu ay ka daahayso curruurtaas aadka u liidata iyo dhibaatooyinka kale ee loo gaysanayo howlaha gargaarka bani'aadnimada waxay hoos u dhac lixaad leh ku keneen tayadii adeegyada howlaha gargaarka taas oo halis gelinaysa nafaha iyo wanaagga carruurta nugal.

“Waxa aan si weyn ugu boorinaynaa in aan sina loo hor istaagin howlaha bani'aadamnimada waxaan kaloo ka dalbanaynaa in si dhakhso ah na loogu soo celiyo xaruntayadii aan ku lahayn magaalada Jowhar iyo in la soo celiyo qalabkii iyo sahaydii la bililiqeystey.” ayaa ay raacisey Hannan Suleymaan.

Macluumaad dheeri ah fadlan kala soo xiriir

Iman Morooka, Salkaalka Isgaarsiinta, UNICEF Somalia, Email: [imorooka@unicef.org](mailto:imorooka@unicef.org), Mobile: +254 714 606 733